

Maxaa dhacaya marka Leadku galo jirkaaga?

Leadku wuxuu jirka galaa marka caruurta ama waayeelku neefsadaan hawo boor leh oo Lead ku jiro ama liqaan waxyaabo Lead ku jiro. Caruurta waxaa Lead ku geli karaa markay gacmahooda wasaqeysan, alaabta ilmuhu ku ciyaaraan, ama waxyaabo kale oo Leadku ku jiro afkooda geliyaan.



CALOOSHA

Jirku wuxuu Leadka kasoo nuugaa caloosha. Tani waxay si sahlan u dhacdaa marka caloosha ilmuhu maran tahay and canuga ay nafaqa darro heyso.




DHIIGGA

Dhiigga ayaa Leadka ku baahiya jirkoo dhan.




MASKAXDA

Leadku wuxuu hoos u dhigi karaa shaqada maskaxda wuxuuna dhalin karaa dhibaato waxbarasho ama dhib dabeecadeed.



LAFAHA

Leadku wuxuu ku dhismi karaa lafaha dhexdooda kadibna si tartiib ah ayuu ugu gudbi karaa dhiigga.



KELYAHA

Kelyaha waxaa gaari kara dhaawac marka Lead farabadan galo jirka.

Baro faallo badan oo ku saabsan dhibaatooyinka Sunta Leadku caruurta u geesato iyo waxaad sameyn karto si aad uga hortagi laheed.



(602) 534-4444 www.phoenix.gov/nsd/lead-safe-phoenix

Document Courtesy of:

